



**Mashruuca
Ka Qayb
Qaadashada
Minnesota**

TILMAANTA MUWAADINKA EE DOORASHADA IYO IS-DIIWAANGELINTA MINNESOTA



**MASHRUUCA KA QAYB QAADASHADA
MINNESOTA: Ololoha Madax Bannaan
aan Faaido Doonka Ahayn ee Dhiirigelinta
Doorashada**

U QALMIDDA DOORASHADA



WAXAAD DOORASHADA KA QAYB QAADAN KARTAA HADDII AAD:

- ugu yaraan jirtid 18 sano
- Maraykan tahay
- deggan tahay Minnesota ugu yaraan 20 cisho doorashada ka hor

GOOBAHA DOORASHADA

Goobta doorashadaada waxaa ay ku taal xaafaddaada. Waxaad ku heli kartaa lambarka xaafaddaada iyo goobta doorashada adigoo la soo xiriira:

- Xoghayaha Guud ee Gobolka Minnesota (Minnesota Secretary of State): www.sos.state.mn.us, 877-600-8683
- Isbahaysiga Haweenka Doorashada Ka Qayb Qaata (League of Women Voters): www.lwv.org
- Soo wac xisaabiyaha/hanti-dhowraha deegaanka ama karaaniga xaafadda (eeg bogga hore qaybta dowladda ee buugga taleefoonnada cad).

HADDII AAD ARDAY TAHAY, waxaad iska diiwaan gelin kartaa aqalkaaga ama dugsigaaga (midkood!) iyadoo ay ku xiran tahay halka aad deggan tahay. Haddii aad arday tahay, sidoo kale waxaad isticmaali kartaa mid ka mid ah dukumeentiyada soo socda si aad isu diiwaan geliso ka qayb qaadashada doorashada:

- Kaarka Aqoonsiga Ardayga oo sawir leh, is diiwaan gelinta ama warbixinta xisaabta biilka oo ay ku qoran tahay cinwaankaaga ee waqti xadidka
- Kaarka Aqoonsiga Ardayga oo sawir leh haddii aad tahay arday ku jira liiska ardada dugsiga deggan kaasoo ay ku caddahay galka goobta doorashada

MAALMAHA MUHIIMKA AH EE SANNAD DOORASHADA 2008:

Talaado, Agoosto 19-eeda

Maalinta ugu dambeysa ee aad isa-sii diiwaan gelin karto Doorashada Hore, illaa 5:00 galabnimo.

Talaado, Sabtambar 9-eeda

Maalinta Doorashada Hore, 7:00 aroornimo — 8:00 fiidnimo.

Talaado, Oktoobar 14-eeda

Maalinta ugu dambeysa ee la isu diiwaan gelin karo Doorashada Guud, illaa 5:00 galabnimo.

Talaado, Noofembar 4-eeda

Maalinta Doorashada Guud. Goobaha doorashada badankood waxaa ay furnaan doonaan laga billaabo 7:00 aroornimo illaa 8:00 fiidnimo. Meelo kooban ee xaafadda ka tirsan ayaa la furi doonaa 10:00 aroornimo. Wixii tifaftir ah ka hubso karaaniga xaafadda.

XASUUSNOW:

- **Sharciga Minnesota waxaa uu kuu fasaxayaa in aad shaqada fasax ka soo qaadato subaxa doorashada hore ee gobolka iyo doorashada guud ee gobolka.** Ra'yiga ka dambeeya ayaa ah ku dhiirigelinta dadka in ay doorashada ka qayb qaataan subaxa hore.
- **Waxaad marwalba iska diiwaan gelin kartaa goobta doorashada.**

WAX DOORASHADA XAALAD GAAR AH

HADDII AAD TAHAY DEMBIILE-HORE islamaarkana aad dhammeysatay xukunkii, oo uu ku jiro kormeerka, xuquuqyadaada dib ayaa loo dhaqangelinayaa waxaadna u qalantaa in aad doorashada ka qayb qaadato. La xiriir sarkaalka ku kormeero haddii aadan xaaladdaada hubin. Haddii u qalmidda aad doorashada ugu qalmayso la hor istaago, waydii madaxa qaaliga doorashada, in uu wax kaaga micneeyo xaaladdaada, waxaadna codsataa in uu kuugu dhaariyo xuquuqda aad doorashada u leedahay. Mar haddii aad sidani sameyso, waxaad awood u helayaa in aad doorashada ka qayb qaadato.

**HADAAD TAHAY SHAKHSI KA NABADGALAY AMA KA BADBAADAY
DHIBAATADA QOYSKA DHEXMARTA**, sida ugu sahlan ama ugu haboon ee aad isu diiwaan galin kartid una codeynkartid adigoo warbixintaadu qarsoontahay waa ka qayb qadashadda barnamijka Badbaadada amaanka guriga (qoyska). Barnamijka badbaadada amaanka guriga (qoyska) waxaa bixiya Xafiska Xoghaynta Gobalka, waxaa kaloo barnamijkan la waddaaga hayadaha gudaha ee u adeega dhibbanaha. Barnamijkan waa mid loogu talagalay in loo helo cinwaan qarsoon badbaadaha dhibaata guriga (qoyska), iyo dhibanayaasha lagaarsiyay xadgudub galmeed (faraxumeen), dabagal hanjabeed iyo qofwalba oo u cabsanaaya naftiisa in loo helo cinwaan badbaada ah (addaris qarsoon). Barnamijka Hoyga nabada wuxuu ka caawinaa in uu dhibanuhu yeesho cinwaan qarsoodi u ah, warqad walba oo loo soo diro waxay ugu imanaysaa cinwaankaas qarsoon ee loo sameeyey.

For more information contact:

Safe at Home
PO Box 17370
St Paul, MN 55117-0370
Toll Free: 1-866-723-3035
Email: Safe.athome@state.mn.us
<http://www.sos.state.mn.us/>

**HADDII AADAN AQAL LAHAYN AMA AAD U DHAXEYSO MEELO KALA
DUWAN**, waxaad iska diiwaan gelin kartaa si aad doorashada uga qayb qaadato adigoo isticmaalaya cinwaanka ku meel gaarka ee aad haatan deggan tahay. Waxaad is diiwaan gelin kartaa doorashada ka hor adigoo cinwaankaasi isticmaalaya, waa haddii aad qorshaynaysid in aad goobtaasi sii degganaan doonto ugu yaraan muddo yar ka hor Maalinta Doorashada. Sidoo kale waxaad is diiwaan gelin kartaa Maalinta Doorashada adigoo adeegsanaya qof ku xaqiijiya.

DOORASHADA MARKA QOF KALE UU KAFIIL KAA NOQONAYO

IS DIIWAAN GELINTA DOORASHADA IYADOO UU QOF KU XAQIIJINAYO

Shaqsi u diiwaan gashan ka qayb qaadashada doorashada ee ku nool xaafadda waxaa loo oggol yahay in uu xaqiijiyo shaqsi kale Maalinta Doorashada. Waxaa uu qofi xaqiijin karaa illaa 15 qofood, waa haddii ay hubaan degganaashadooda xaafadda. Tusaale ahaan, haddii aad doorashada la aadid deriskaaga, isaga ama iyada waxaa loo oggol yahay in uu qaadiga doorashada u sheego in aad deggan tahay xaafadda, kalmaddiisa ama kalmaddeeda ayaa loo aqbalayaa caddaynta degganaashadaada.

QOFKA KU XAQIIJINAYA WAA IN UU XAAFADDA DEGGAN YAHAY.

Hal mid ah ayaa ka baxsan shuruuddani: haddii aad deggan tahay xarun deegaan ee diiwaan gashan, sida aqal kalkaaliso ama goobta badbaadada dadka aan aqalka lahayn, shaqaalaha xarunta ayaa ku xaqiijin kara, iyo shaqsiyaadka deegaanka ku nool ee caddayn doonaya Maalinta Doorashada (xad ma laha tirada dadka deegaanka ku nool ee uu shaqsi shaqaale ahi xaqiijin karo).

XASUUSNOW:

- **Waxaa ra'yi fiican ah in aad is diiwaan geliso ka hor Nofembar 4-eeda.** Taasi waxaa ay ka matalaysaa rabitaankaaga ah ka qayb qaadashada Maalinta Doorashada.
- **Waxaa aad laguugu dhiirigelinayaa in aad soo qaadato caddayn aqoonsi xilliga aad doorashada ka qayb qaadanaysid.**

KA QAYB QAADASHADA DOORASHADA IYADOO LA MAQAN YAHAY

KA QAYB QAADASHADA DOORASHADA IYADOO LA MAQAN YAHAY

Adigoo maqan ayaad doorashada ka qayb qaadan kartaa waa haddii aadan awoodin in aad doorashada ka qayb qaadatao Maalinta Doorashada iyadoo ay sababta tahay adigoo:

- ka maqan aqalkaaga
- xannuunsan ama itaal darran
- ah qaali doorasho ka adeegayo xaafad kale
- awoodin in aad tagtid goobta doorashada iyadoo ay ugu wacan tahay ciid diineed

Si aad adigoo maqan doorashada uga qayb qaadatao, dalab qoraal ah u soo gudbi xisaabiyaha/hanti-dhowraha deegaanka ama karaaniga xaafadda. Waxaad doorashadaada kaga qayb qaadan kartaa shaqsi ahaan goobta uu kuu diro xisaabiyaha/hanti-dhowraha deegaankaaga ama boosto ayaad ku soo diri kartaa. Sidoo kale waxaad codsan kartaa in laguugu daro liiska ka qayb qateyaasha doorashada dadka maqan ee joogtada ah waa haddii uu deegaankaagu is beddelin. Waxaad liiskani ka mid ahaan kartaa illaa aad ka codsataa in lagaa saaro.

WAXAA JIRA KIISAS XAD LOO YEELAY EE AADAN DOORASHADA UGA QAYB QAADAN KARIN:

- Waxaad ku guda jirtaa amar maxkamadeed ee ay maxkamaddu kaa hor istaagayso xuquuqdaada doorashada
- Waxaa ay maxkamadi kuugu soo oogtay in aadan u qalmin ka qayb qaadashada doorashada

DIIWAAN GELINTA SHAQSI GA DOORASHADA KA QAYB QAADANAYO

Waa in aad is diiwaan gelisaa oo laguugu daraa liiska rasmiga ee shaqsiyaadka doorashada ka qayb qaadanayo inta aadan doorashada ka qayb qaadan. Waxaad magacaaga ku dari kartaa liiska adigoo buuxiya **Dalabka Diiwaan Gelinta Shaqsiga Doorashada Ka Qayb Qaadanayo (Voter Registration Application)**. Marka aad dalabka buuxinaysid, waa in aad xilliga doorashada bixisaa cinwaanka halka aad ku nooshahay. Waa sharci darro in aad doorashada kaga qayb qaadataa cinwaan aad hore u degganaan jirtay maadama ay dad cusubi cinwaankaasi isticmaali doonaan.

IS DIIWAAN GELINTA DOORASHADA KA HOR

Buuxi Dalabka Diiwaan Gelinta Shaqsiga Doorashada Ka Qayb Qaadanaya shaqsi ahaanna u soo celi ama boostada ugu soo dir xisaabiyaha/hanti-dhowraha deegaanka ama Xoghayaha Gobolka. Foomamka Diiwaan Gelinta Shaqsiga Doorashada Ka Qayb Qaadanaya waxaa laga helayaa maxkamadaha deegaanka, dowladaha hoose ama waxaad koobi kala soo bixi kartaa bogga internetka ee Xoghayaha Gobolka Minnesota (www.sos.state.mn.us/docs/vr_app_som.pdf). Sidoo kale waxaad doorashada isu diiwaan gelin kartaa marka aad dalbanaysid ama cusboonaysiinaysid laysanka darawalnimada ee Minnesota ama kaarka aqoonsiga ee gobolka.

ISU DIIWAAN GELINTA DOORASHADA MAALINTA AY DOORASHADU DHACAYSO

Waxaad iska diiwaan gelin kartaa goobta doorashada Maalinta ay Doorashadu Dhacayso (Is-Diiwaan Gelinta Isla Maalintaa). Waxaad u baahanaysaa mid ka mid ah waxyaabaha soo socda kuwaasoo caddaynaya halka aad deggan tahay:

- Laysanka Darawalnimada Minnesota oo aan dhacsanayn, fasaxa barashada darawalnimada, kaarka aqoonsiga (ama rasiidka dalbashada mid cusub), ama kaarka Aqoonsiga qabiilka kaasoo ay ku caddahay cinwaankaaga xaafadda, ama
- Kaarka "Ogeysiiska Diiwaan Gelinta Raagtay" oo uu kuu soo diray xisaabiyaha/hanti-dhowraha deegaanka (haddii aad la raagtay xareynta kaarka diiwaan gelinta), ama
- Shaqsi ka diiwaan gashan xaafadda aad deggan tahay in uu xaqiijiyo halka aad deggan tahay, ama
- Baasaboore Mareykani, kaarka aqoonsiga militariga Mareykanka, Kaarka Aqoonsiga qabiilka ama aqoonsiga ardayga oo wata magacaaga iyo sawirkaaga IYO biilka dhabta ah ee biyaha, mariinnada biyaha, gaaska, korontada, taleefanka, qashinka ama adeegyada kaybalka taleefishinka oo wata magacaaga iyo cinwaanka aad deggan tahay ee xaafaddaada kuwaasoo ay ku qoran tahay xilliga biilka lagaa doonayo oo ah 30 cishood gudahood ee maalinka doorashada.